


Warqadani waxa loogu talogalay in lagu caawiyo ardeyda muhaajiriinta bilaa sharciga ah iyo helayaasha DACA ee degan Utah inay fahmaan akhtiyaarkooda ka qeybgalida iyo bixinta lacagta koolejka.



Dadka riyooda oo dhan halkan waa lagu soo dhaweeyaa.

Sawirka Nathan Dumlaao, oo loo isticmaalay ogolaansho

Awoodida Koolejka

Lacaga gobolka

Sharciga Utah House Bill 144, ardeyda bilaa sharciga ah waxay ku haboon yihiin lacagta gobolka haday ka qeybgalaan dugsiga sare ee Utah saddex sano ama ka badan kana qalin jabiyaan dugsiga sare ee Utah ama helaan GED ka Utah. Ardeydu waa inay gudbiyaan Warqad-codsi HB 144. iyagoo soo maraya koolejkooda.

Deeqaha Waxbarasho

Ardayda aan sharciyeysnayn waxay kaloo u qalmi karaan deeqaha waxbarasho ee gaarka ah, qaar ka mid ah gobolka, iyo/ama hay'adaha.

Ardeyda waxa lagu dhiirigalinaya inay codsadaan deeqaha waxbarasho ee ay ku haboon yihiin. Wabsaaydada manaafacaadka leh waxa ka mida:

- Keys to Success
- Dream Centers (SLCC & UU)
- Edúcate-Utah

Ka qeybgalida koolej

Ka qeybgagalida koolej Utah ah

Ardeyda bilaa sharciga ah iyo helayaasha DACA waxay ka qeybgali karaan koolej Utah ku yaal. Dhamaan ardeyda, iyadoon loo eegin xaaladooda muhaajirnimo, waxay ku haboon yihiin inay galaan koolejyo iyo jaamacado sumcad leh (dadweyne ama gaara) oo ku yaal Utah.

Ka qeybgalka koolej ka baxsan gobolka

Gobolkastaaba wuxuu leeyahay shuruucdiisa khuseeya galitaanka koolejka ee bilaa sharciga iyo helayaasha DACA. Kala hadal xafiiska galitaanka ee koolejka aad rabtid si aad ugala doodid doorashoooyinkaaga.

FAFSA

Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardeyga Fadaraalka (FAFSA) waa codsiga ardeyda ay tahay inay dhameystiraan sanadkasta si u codsadaan kaalmada maaliyadeed ee fadaraalka, oo ay ku jiraan deeqaha Pell, daymaha ardeyda fadaraalka iyo shaqada.

Qaarka ka mida "muwaadiniinta ku haboon" ayaa dhameystiri kara FAFSA kuna haboonaan kara kaalmada maaliyadeed ee fadaraalka. Si aad u dhamesytirtid FAFSA adoo muwaadin ku haboona, waxaad u baahan doontaa inaad labadaba galisid Nambarka Diwaangalinta Ajaanibta FAFSA.

Marka loo eego sharciyada hada, ardeyda bilaa sharciga iyo helayaasha DACA laguma darin qeybta muwaadiniinta ku haboneyn, oo sidoo kale kuma haboona kaalmada maaliyadeed. Inta ugu badan xaaladaha, ardeyda bilaa sharciga ah iyo helayaasha DACA uma baahan doonaan inay dhameystiraan FAFSA. Hadii aad codsaneysid deeqaha waxbarasho ee u baahan inaad dhameystirtid FAFSA, kala hadal xafiiska kaalmada maaliyadeed ee koolejkaaga ama jaamacadaada wixii caawimo ah.

Hadii aad tahay muwaadin Mareykan ah lakiin waalidkaagu aanay sharci haysan, waxaad awoodaa inay tahay inaad dhameystirtid FAFSA. Wuxuu u baahan doontaa inaad galisid o yo nambarka soshiyal sekuyuuratiga oo aad daabacdid, saxeexdid, una dirtid boga saxeexa FAFSA.